


MAXAAN U TALLAALAYAA ILMAHAYGA MARKUU LIX BILOOD JIRO AMA KA WEYN YAHAY?



- BPHC waxay ku talinaysaa in qof kasta oo da'diisu tahay 6 bilood iyo ka weyn laga tallaalo COVID-19. Tallaalku wuxuu **ilmahaaga ka ilaaliyaa** jirro daran COVID-19.
- Tallaalida carruurta xaqa u leh in la tallaalo waxay ka hortagtaa inaysan si daran ah u bukoon xiitaa haddii ay cudurka qaadaan waxayna ka hortagtaa dhibaatooyinka halista ah ee muddada gaaban iyo kuwa fog ee COVID-19
- Carruurta waxay u gudbin karaan fayraska dadka kale xitaa haddii aysan xanuunsanin, oo ay ku jiraan dhallaanka aadka u yar in la tallaalo iyo qoyska iyo asxaabta kale ee khatarta sare ugu jira inay aad ugu bukoonaadaan COVID-19.
- Tallaalida ilmahaaga waxa ay ka caawin kartaa in ay ku sii jiraan daryeelka ilmaha oo ay ka dhigto mid ammaan u ah inay ku raaxaystaan hawlaha ay jecel yihiin!

TALAALKA COVID-19 AMAAN MA U YAHA CUNUGAYGA?

- Haa. Tallaalada COVID-19 waa kuwo badqaba oo waxtar u leh carruurta jirta 6 bilood iyo wixii ka weyn.
- Malaayiin carruur ah oo da'doodu tahay 5 iyo wixii ka weyn ayaa si badqab leh ayay u qaateen tallaalka. Khatarta iyo dhibaatooyinka halista ah ee suurtagalka ah ee COVID-19 ayaa ka miisaan badan halista suurtagalka ah ee naadirka, falcelinta xun ee tallaalka.



CARRUURTU MIYAA LA SIIYAA KUURAHA TALLAALKA COVID-19 EE KUWA KALE KA YAR MARKA LOO EEGO DHALINYARADA IYO DADKA WAAWEYN?

Haa. Kuuraha tallaalka COVID-19 waxay ku saleysan tahay da'da maalinta tallaalka, maahan cabbirka ama miisaanka ilmaha. Tani waxay sidoo kale run ka tahay tallaalada kale ee sida joogtada ah loogu taliyay, sida cagaarshowga A iyo cagaarshowga B.


CARRUURTU SI BADQAB LEH MA U HELI KARAAN TALLAALLO KALE ISLA MAALINTA AY QAATAAN TALLAALKOODA COVID-19?

- Haa. Tallaalka caadiga ah waa adeeg ka hortag oo muhiim ah oo aan dib loo dhigin.
- Haddii tallaalo badan la bixiyo hal booqasho, tallaalka kasta waxaa lagu siin doonaa meel kale, marka loo eego talooyinka da'da.



MIYAAN WELI TALLAALAYAA ILMAHAYGA HADDII AY HOREY UGU DHACAY COVID-19?

- Haa. Caddayn ayaa muujineysa in dadku ay ka helaan difaac dheeraad ah iyagoo is tallaalaya ka dib markii ay qaadeen fayraska sababa COVID-19. Difaacan ayaa muhiim u ah in laga ilaaliyo ilmahaaga inuu aad ugu bukoon karo COVID-19 mustaqbalka.
- Carruurta uu ku dhacay COVID-19, kuuradooda xigta waxa dib loo dhigi karaa 3 bilood laga bilaabo marka astaamuhu billowdeen ama, hadday aysan astaamo yeelanin, 3 bilood laga bilaabo markii ay heleen natiijada baadhista cudurka laga helay.



JADWALKA TALLAALKA

Carruurta da'doodu ka yar tahay 5 sano waa inay helaan tallaalka lamid ah kuuradooda labaad (iyo saddexaad) ee taxanehooda aasaasiga ah sida ay heleen kuuradoodii kowaad. Waxaa loo tixgalin doonaa in si buuxda loo tallaalay laba toddobaad ka dib midkooda kuuradooda saddexaad ee Pfizer ama kuuradooda labaad ee Moderna.

PFIZER

- Da'aha: 6 bilood ilaa 4 sano
- Kuurooyinka: Saddex
- Jadwal: Kuuraha labaad ee la qaatay ugu yaraan 21 maalmood (3 toddobaad) ka dib markii kuuradii kowaad, iyo saddexaad la qaatay ugu yaraan 56 maalmood (8 toddobaad) maalmood ka dib midkii labaad.

MODERNA

- Da'aha: 6 bilood ilaa 5 sano
- Kuurooyinka: Labo
- Jadwal: Kuuradii labaad ayaa la keenay ugu yaraan 28 maalmood (4 toddobaad) ka dib midkii kowaad



Haddii aad wali qabto **su'aalo** ku saabsan dheefaha iyo khatarta tallaalka ilmahaaga, BPHC waxay kugu dhiirigelinaysaa inaad kala hadasho dhakhtarka carruurta ama bixiye kale oo caafimaad oo lagu kalsoon yahay.